
# Gorfayn Dhigane: Aanadii Negeeye

**Qore/ Mufakkir: Maxamed Cabdirisaaq Saciid "Samiik"**

17kii Dul-qicdah, 1436H = 01dii Sebteembar, 2015M

Waxa aan ku bilaabahayaa magaca Allaah; Allahaas oo ay u sugnaatay naxariista guud iyo naxariista gaar. Ilaahayow adiga ayay kuu sugnaatay mahad badan, waxan eegga iyo marar kale ba ahaan doonaa addoon kaaga mahad celiya nimcooyinka badan ee giddi wada qaalliga ah, ee aad igu galladaysatay. Aniga oo aan wada tirin karin, isla mar kaanna intaan xusuusto halkan ku wada qori karin; ugu horrayn, Eebbow, waxa aan kaaga mahad celinayaa nimcada abuurka, nimcada aadannimada, nimcada nolosha, nimcada islaamka iyo iimaanka, nimcada caqliga, nimcada xifdiga iyo fahamka, nimcada awoodaha tiro beelka ah ee aad igu deeqday iyo dhammaan nimcooyinkaaga Rabbiyow, isugu jira kuwo aan garan ilaayo aminka iyo kuwo aan gartay ba. Kulligood waan kaaga mahadin. Waxa aan qirayaa Alle xaq lagu caabudo in uu jirin Allaha weyn mooyaan e' - waxaa igu filan Ilaahay; Ilaah ma jiro xaq lagu caabudo isaga mooye, isagaan talo saartay, isagu na waa Rabbiga carshiga weyn - waxa aan qirayaa in nabi Maxamed NNKH yahay addoonkaagii iyo ergaygaagii - Allow naxariis iyo nabadgalyo, nabigaaga Maxamed NNKH korkiisa yeel. Bulshooy, waxa aad markhaati ka ahaataan: in aan Ilaahay raalli uga ahay Rabbinnimo; islaamkana raalli uga ahay diinta xaqqa ah, ee in la isku dhaqaa waajib tahay; iyo in Maxamed NNKH raalli uga ahay nabi xaq ah oo Eebbe u soo diray dunida in uu hanuuniyo yahay.

## Gorfayn Dhigane: Aanadii Negeeye




### Hordhac:

Niyad wanaag iyo farxad xoog badan ayaa aan ku soo dhaweeyaa qoraal wal ba oo af Soomaali ku qoran, kaas oo uu qoray qof Soomaali ah, ama aan ahayn. Labo qodob ayaa taa sabab u ah. Dhaqanka akhriska iyo qoraalka waa mid nolosha casriga ah kaalin heer sare ah kaga jira guud ahaan tayada nolosha ee bani'aadamka, Iyo gaar ahaan tiigsashada fog ee gaadhitaanka guulaha waaweyn. Sidaa darteed, dhaqankaas, waa waajib akhlaaqiya manhajka Soomaalida in lagu daro, si loo ilaaliyo hal-abuurkooda. Iyo qoraalka oo ah habka ugu toolmoon ee bulshooyinku si wal isku baran karaan.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Qarniyaal badan ayaa ay soo noolayd bulshada Soomaaliyeed. Shakki culus in la geliyo tirada qarniyada, asalka jiritaan, iyo ilbaxnimadii weynayd ee ay lahaayeen, waxa ugu wacan sooyaalkooda oo aan lahayn raadraac iyo tixraac sugan, cilmiyeed, oo si xaqiiq ah lagu kalsoonaan karo. Taasi waa xanuun weyn oo damiirkeenna iyo garashadeenna ceebaynaya ama ceeb ku ah. Waa calaammad si dhab ah u muujinaysa ahaanshaha bulsho karti darran, aqoonteedu hoosayso, oo adduun araggeedu aad u liito; iyo mooganaanta aynnu moogan nahay awoodda ereyga qoran iyo sirta macne ee ku duugan. Qoraal la'aantu waa ta keentay dunidu in ay na garan waydo bulshada aynnu nahay, halka aynnu ka soo jeedno, iyo fahamkeenna fog ee nolosha. Waa ta keentay waayo-bulsheed badan oo waxtar badan inoo lahaan lahaa eegga in aynnu haysanin, oo aynnu ba hantiyin!

Hal-abuurkii Soomaaliyeed ee maaddo wal ba ee sebannadii hore, sababta loo heli waayey qoraal la'aan in ay tahay ka dambow, waxa ay qiimayn u tahay sida aynnu uga dhacsan nahay ifka aynnu joogno iyo fursadaha bulsho wal ba jiritaankeeda iyo joogisteeda ku difaacato. Hadda ba, dhaqankaa in la beddelo muhiim keliya ma aha, ee waa waajib muhiim ah. Sidaa awgeed, nolosha casriga la ma qabsan karno haddii aynnu ilaashan waxa ay tahay in aynnu ilaashanno. Dhaqanka akhriska iyo qoraalka manhajkeena nololeed ku daristiisa iyo ku dhiirrigelinta shacabkeenna, waa baahi laga maarmaan u ah toosnaanta nolosheenna iyo turmaagnaanta falsafadeenna bulsho. Dheefaha qoraalka dheefta ugu weyn, waa in aad is qeexdo, dabadeed, sidaa laguu aqoonsado. Sidaa daraaddeed, bulsho aan qoraal lahayn waa bulsho aan qeexnayn; qeexid la'aantaasi na waa sababta inoogu wacan dunidu in ay garan waydo, meel aynnu ka nimid, si aan nahay, iyo jiho aan u soconno ba. Dheefta taa ku xigta, waa in aad bulshooyinka u soo gudbiso hal-abuurkaaga gaar ahaaneed, taa oo macne weyn u samaynaysa fahamka muuqnaanshahaaga iyo murtidaada. Sababahaa iyo kuwo ka sii farcamaya ayaa aan u caashaqsan ahay, cindigayga iftiin uga dareemaa, oo noqdaa qof ciribgo'id iyo ciribdarro ka badbaaday; marka aan dhigane af Soomaali ku qoran dhaayahaygu halacsadaan. Waxa aan ku tilmaami karaa arrintaa: maanfuran wacan.

"Aanadii Negeeye", waa dhigane ku soo biiray maktabadda af Soomaaliga, ee la nool qaawanaan iyo qaabdarro badan. Waxa uu la bah yahay saaxiibbo isaga ka horreeyay oo mawduuca sheeko faneedda ku saabsan. Waxa gacantayda uu soo galay 27[kii] Abril, ee sannadan. Mahadnaq walaaltinnimo waxa aan u dirahayaa, qoraa Xuseen Xasan Xuseen (qoraaga dhiganaha: Warqaddii Reer Berbera) oo aniga ii soo hadyeeyay. Saddex arrimood ba waa aan u xiiseenayay akhrintiisa. Qoraaga oo aannu jaal ku wada nahay Faysbuugga, isla markaanna ku wada jirno bahda qalinleyda, aad na u xiiseeyo uga na warhayo qoraalladiisa; sheeko faneedda af Soomaaliga ku qoran oo aan daneeyo heerarka ay marayso xog'ogaal in aan u noqdo; iyo aniga oo qoraaga ku kala duwan nahay aragtiyo iyo afkaaro dhowra, oo aan dhiganahanna ka baadhayo kuwaas, ayaa ah sababaha ugu muhiimsan ee danaynta akhriskayga sheekadaa.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Xuseen kolkii uu gaadhi u kala goosha Boosaaso iyo Hargeysa igu soo dhiibay hadyaddaas qaalliga ah, waxa aan doontay soo qaadashadeeda, ka dib markii uu I la soo xidhiidhay walaalkii loo soo dhiibay. Intii aan jidka ku sii jiray, arrin naxdin badan iyo feker xoog leh igu abuurtay ayaa aan la kulmay. Waddo weyn aniga oo maraya ayaa aan u jihaystay waddo yar oo i gaynaysay kobtii aan kula ballansanaa walaalka. Ri' ayaa daasad kuwa caanaboodhaha lagu keeno mid ka mid ah madaxa la gashay. Waa ay girifgirif laysay, mar ba dhan isku qaadday, oo ay galgalatay. Alla naftu xanuun kululaa, ayaa aan hoos hoos isugu idhi. Neefkaa kaalmo ma u fidisaa, ayaa maankaygu igu jalbeebay. Runtii, labada gacmood alaab ayaa aan ku siday, sida xaalku yahay na waxa uu dareenkayga ku abuuray cabsi feker daaran iyo naxdin damqasho huwan; wax aan sameeyo waa aan garan waayey!

Hareeraha ayaa si yar oo xarragaysan u dhugtay, aniga oo go'aansaday in aan alaabta dhigto, oo naflaydaa galgalanaysa, ee mar ba madaxa meel la dhacaysa aan nafteeda badbaadiyo. Nasiib wanaag, walaalo ayaa hawshaa iga furtay oo meel aan fogayn ka soo orday. Nin ba si u hadal, waaya'aragnimo na la isu geegee, gunaanadkii shaqo wanaagsan ayaa la qabtay. Anigii na waxa aan abbaaray jihadii aan u socday, walow ilaa in dhowra aan mar ba sii eegayey meeshii. Naflaydu itaal xumaa oo karti darranaa, mis na kibir iyo ismoogeysiin badanaa!!! Bowsi iyo baaweyn badanaa, mis na taakulayn iyo tabantaabo jecelaa!!! Abdo iyo abaalcelin xumaa, mis na yeelid iyo yabooh jecelaa!!! Layaabadaas ayaa igu soo noqnoqanayay aniga oo la yaabban guud ahaan dhaqanka-dabeecadeed ee noolaha, gaar ahaan bani'aadamka!

Sidii aniga oo ah, oo erayadaasi maankayga ka guuxayaan ayaa aan buuggan soo qaatay. Farxaddii buugga iyo naxdintii dareenkayga ayaa maskaxdayda ku dhex dagaallamay. Habeenkii kolkii aan guriga imid, ayaa aan maktabadayda geliyay aniga oo buugga xusuus-qorka ku qoray wakhtigii gacantayda uu soo galay, iyo mudanihii ii soo hadyeeyay. Waxa aan akhriyey, si qoto dheer u akhriyey, oo murtidiisa dhuuxay saddex bilood ka dib muddadaa. Labo silsiladood oo mid na fiqhiga Xanafiyada ku saabsan, mid na caqiiddada calmaaniyadda, ayaa aan daraasaynayey oo gorfayntoodii ii socotay. Sidaa aawadeed, kansho wanaagsan waa aan u heli waayey dhammaynta kuwaas ka dib mooyaane. Haddii aan akhriyey, waxa aan jeclaystay, istusay, oo waajib garasho u arkay, muhiimadda ay lee dahay sheekadaa in aan gorfeeyo, oo akhristaha aan weli akhriyin la wadaago fahamkayga gaar ahaaneed ee sheekadan.

Hadal iyo nuxurkii, gorfaynta qoraalladu waxa ay hiil u tahay helidda tayo badan iyo tiro yar, iyo dhisidda bulsho aqoonaysan oo ku baraarugsan qorayaasheedu waxa ay u qorayaan. Sidaa awgeed, gorfayntani, ugu horrayn, waxa ay wax ka sheegi doontaa bilicda buugga iyo xog guud, dabadeed, waxa ay soo koobi doontaa nuxurka sheekada, waxa na ay soo bandhigi doontaa dheefaha iyo dhaliilaha, ugu dambaynna, waxa aan ku soo gebagebayn doonaa aragtidayda iyo odhaahdayda shakhsiga ah.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

# Bilicda Buugga:

Kolka dhiganaha aad gacantaada ku qabato, dabadeed, aad kor u qaaddo si aad u daadaawato muuqaalkiisa, wax baa aad fahmi doontaa. Ugu horrayn, jaldigiisa ayaa kaa yaabbin doona. Waa jaldi adag, quruxsan, oo gudaha ugu jira buugga. Marka dib aad ugu noqoto korkiisa, saddex midab ayaa indhahaagu arkahayaan. Midab madow oo jaldiga wada haysta, midab cad oo qoraha magaciisa iyo sawirka buuggu ku wada muuqaalaysan yihiin, iyo midab cas oo magac bixinta sheekada loo gaar yeelay.

Sida la wada ogsoon yahay, midabka cas waxa uu ka turjumaa halis iyo khatar; sidaa awgeed, magaca buugga ayaa ba xambaarsan arrimahaas. Aanadii Negeeye, sidaa marka aad u dhugato magaca, farriinta erayadu ku siinayaan ayaa ah: nin magaciisu yahay Negeeye oo cid qaraabadiisa ah la dilay, isla markaanna isagu dilkaas ka daba tagay oo aargudasho la yimidday. Aargudasho kuma timaaddo baryo, jiljileec iyo naxariis. Dhimbiillo kulul, rasaas ah, oo midabkoodu cas yahay, ayaa ay dhabtii ku timaaddaa. Waa sidaa, sababta midabka "cas" magaca sheekada loogu qoray. Waa sidaa, sababta magaca dhiganuhu halisyo iyo khataro u xambaarsan yahay, Midabka madow ee jaldigu ku qaabaysan yahay, macne gun fog ayaa ku duugan. Waa sida aad aaminayso. Duni madow in uu ka hadli doono, oo muuqaalkeedu naxariis iyo nabad ka madhan yahay, ayaa aad ku qanacsan tahay kolka magaca sheekada ka duusho.

Sawirka dhexda kaga yaalla, ayaa dareenkii argagaxa lahaa ee aad magaca ka qaadday kugu sii labo jibbaaraya. Waxa aad in badan is weyddiinaysaa, wuxu maxaa uu yahay? Ma gacmo dad baa? Ma hangoollo la isu keenay baa? Ma geedo la qoray baa? Ma ay jiq ah baa? Ma kobtii Negeeye ku aargoostay baa? Dhiigga cas ma dhiigii kii uu dilay baa? ...? Intaas oo weyddiinood iyo qaar kale ayaa aad ahaanaysaa qof wakhti iyo ereyo badan ku lumiya. Jaldiga sare, xagga sare, waxa ku qoran magaca qoraaga, Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", waxa ku xiga magaca sheekada oo ku qoran far waaweyn, AANADII NEGEEYE, waxa ku sii xiga sawirka maanka wareerinaya, waxa ugu dambeeya, abtirsiinta dhiganaha oo ku abtirsanaya taxane lagu magac dhabay, taxanaha cirsankayeedh. Jaldiga dambe, waxa ku qoran erayo nin magaciisu yahay, Jaamac Muuse Jaamac, buugga ku qeexayo, iyo summadda buugga. Bilic cajiib ah.

# Xog Guud:

Waxa aad is weyddiinaysaa kolka jaldiga ka soo dhammaato, weyddiimo ay ka mid yihiin: taxanaha cirsankayeedh waa maxay? Buuggani maxaa uu ku saabsan yahay oo uu ka hadli doonaa? Yaa qoray? Qoraagu waa kuma? Goorma ayaa la daabacay? Yaa daabacay? IKK.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Jaldiga gudaha dhiganaha ku jira, kiisa bidix ayaa taxanaha cirsankayeedh lagu sharraxay. "… *Soomaalidu waxay tidhaahdaa waxa jira wax dadka wax u sheega, oo aan la arag, dadka qaarkiina waxay yidhaahdaan, waa shimbiro qaar kalena rooxaan. Haddaba shimbirahaa aan la arag, kuwa wanaagga sheega midkood baa la yidhaahdaa "Cirsankayeedh". Fikradda ka dambaysa taxanaha "Cirsankayeedh" waa sidii loo dhisi lahaa dhaqan qoraaleed iyo dhiirrigelinta akhriska ee bulshada Soomaaliga ku hadasha."* Labo arrimood ayaa aynnu halkaa ka ogaanaynaa. Qeexidda "Cirsankayeedh" oo lagu macneeyey mid ka mid ah shimbiraha aan la arag ee wanaagga sheega; waa qeexid sax ah oo sugan. Hadda ba, weyddiintu waxa ay tahay, sheekadani ma tahay oo ma noqon doontaa, sheeko wanaag sheegta? Jawaabteeda habboon waxa aynnu heli doonaa marka aynnu si heer sare ah u dhuuxno murtideeda. Waxa sidoo kale, la inoo sheegay fikradda ka dambaysa taxanahan, kaa oo la inoogu macneeyay sidii kor loogu qaadi lahaa dhaqanka akhriska iyo qoraalka, isla markaanna loo unki lahaa bulsho u carbisan dhaqammadaas wanaagsan. Taasi waa wax wanaagsan oo xaq u leh in la soo dhaweeyo. Waa na aragtidii aan ku sheegay: maanfuran wanaagsan in ay tahay.

Aanadii Negeeye, waa sheekadii labaad ee taxanahaas. Waxa ka horraysay uun "LADH", oo uu qoray Cabdillaahi Cawed Cige. Sida xogta buugga ku jirta, taxanahan waxa isku dubbarida Jaamac Muuse Jaamac, waxa na daabaca shirkadda loo yaqaan, Ponte Invisible Edizioni. Buugga waxa uu ku saabsan yahay sheeko faneed, mawduuc ahaan. Sida xogtu ay inoo sheegayso, waa suugaan abuuristeedu ku salaysan tahay hindisaha iyo mala'awaalka abwaanka curiyey. Halkaa waxa aynnu ka fahmaynnaa, sheekadu sheeko dhab ah oo dhacday in aysan ahayn ee mala'awaal tahay, iyo in ay ka timid maanka curiyaha.

Ibraahin Yuusuf Axmed, oo lagu naanayso "Hawd", waa qoraaga sheekada. Sida xogta af Ingirisiga ku qoran inoo sheegayso, waa qoraa lagu yaqaanno sheeko qorista, sidoo kale leh, hab gaar ah oo ku gorfeeyo buugaagta afka Soomaaliga ku qoran. Si joogto ah waxa uu mareegaha Soomaalida ugu daabacaa maqaallo af Soomaali ku qoran. "Soomaaliya: Qaran iyo Qabiil" waa buuggiisii ugu horreeyey, ee uu ku daabacay Iswiidhan, 1998-dii. Kanna waa kiisii labaad iyo kiisii ugu horreeyey ee sheekada dheer, ee qoraaga mawhibada u leh curinta sheekada dheer.

Curiyuhu waxa uu ka afeef dhiganayaa, sheekadiisu in aanay ku salaysnayn dhacdooyin dhab ah iyo shakhsiyaad jiray. Sidoo kale, waxa uu caddeeyey in gebi ahaan ba sida ay u dhan tahay mala'awaal maankiisa uu ka hal-abuuray in ay tahay. Sidaa darteed, magacyada, shakhsiyadda jilayaasha iyo xaaladuhu ba waxa uu inoo sheegayaa riwaayad uu abuuray in ay tahay. Haddii xaalku sidaa yahay na, wixii isu ekaansho ah ee aynnu ku dhex aragno sheekada, wax uu san u qasdiyin in ay tahay, ayaa aynnu u fahmaynaa.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

**Magaca dhiganaha: Aanadii Negeeye**

**Magaca qoraha: Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"**

**Soosaaraha: Ponte invisible**

**Magaalada: Pisa**

**Sanadka: 2007**

**Cutub: 12**

**Bogagga: 412**

**Taxanaha: Cirsankayeedh "2"**

**ISBN: 38-88934-05-7 (pbk)**

**Xajmiga: 13x20cm**

………………………………………………………………………

# Nuxurka Sheekada:

- Markii aan akhriyey anigu, akhriste nuxurkeedii ayaa aan kula wadaagayaa.

Sheekadu waxa ay ku bilaabantay qaab aad iyo aad u qurux badan. Sheekada oo gadaal gadaal laga soo bilaabo iyada oo xusuus furfurasho looga gol lee yahay, dabadeed, diiwaanka dhacdooyinka iyo kaydka xusuusaha si wanaagsan loo kala furo, dhacdo ba dhacdo sabab u noqoto, wakhti ba wakhti qiyaas u noqdo, oo sidaa bilow ilaa dhammaad loo xidhiidhiyo dunida sheekadu ay ka warramayso; waa si ka mid ah, ugu na cuddoon, siyaalaha sheeko faneed qorista loo bilaabo. Waa isla sida, Aanadii Negeeye, sida ay ku bilaabanayso.

Aanadii Negeeye, waa filim soconaya saacado badan, oo ay ku jiraan jilayaal afartan ku dhawaad ah, oo isugu jira shakhsiyaad iyo qoysas. Kolka cajalka filimka aad shido, waxa kuu soo baxaya sawir madow. In yar ka dib na waa caasimaddii, qalbigii iyo muraayaddii ummadda Soomaaliyeed oo holac darani ka baxayo, dundunsan, oo meel laga haajiray u eg! Muuqaalkaa argagaxa leh, waxa maankaaga uu ku abuurayaa weyddiimo dhowra. Yaa Muqdisho sidan u galay? Eeddeeda yaa ka mas'uul ah? Maxaa ay galabsatay oo halaagan ugu wacan? Sawirkaa guud ee magaalada ka dib, sawirkii waa uu is beddelayaa.

Hiyikicintaas ka dambow, waxa kuu soo baxaya guri aad u qurux badan oo magaciisu hoosta kaga qoran yahay, Fillo Adduun. Waa nin weyn oo kursi dhabar jiifsi leh si wanaagsan oo fidsan isugu kala bixiyey. Gacantiisa midig waxa ay saaran tahay dhafoorkiisa midig. Waa caways gudcur ah. Aad ayaa uu u fikirayaa. Fikirkaas ayaa saldhig u noqon doona duulitaanka diyaaradda Aanadii Negeeye.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Diiwaankii dhacdooyinka ayaa sidii qasri madaxtooyo oo malaayiin albaab leh, albaab albaab u furmaya. Magaca ninkan kursiga ku fadhiya ee fikiraya waxa filimku ku magacaabayaa, Negeeye Geeddi Buraale. Waa afartan jir diif iyo dulinnimo badan ka muuqato. Caawa waxa uu goobtan u fadhiyaa in uu is xisaabiyo. In uu noloshiisa guul iyo guul darro ba dib u gorfeeyo. Iyo in dabadeed, qofnimadiisa qiimeeyo. Waxa uu kala furay buuggiisa nololeed, waxa na uu dib ugu noqday oo raadkeeda qaaday sooyaalkiisii. Waxa uu galay xaalad uu san jeclaysanayn, oo runtii, aad iyo aad uu u necbaa. Bal se, waa uu ku khasbanaa bal in uu wax ka ogaado taariikhdiisa runta ah.

Wakhti beesha uu ku abtirsado ay go'aansatay in ay guurto, hayaan dheer isu diyaariso, oo qabanqaabadeedii lagu gudajiro, ayaa uu dhashay Negeeye. Cod dumar ayaa hal mar la maqlay oo leh: "Waa Wiil! Waa Wiil! Waa Wiil!!! Ma ahayn xilli dadku filahayey ilmo yar in uu dhalanayo. Wakhti jiilaala, oo xaaladda deegaanku aad u xun tahay, oo in la hayaamo oo meel naq leh la tago mooyaanee wax kale aan maanka lagu hayn ayaa uu dhashay. Qalalaasaha ugu horreeya ee sheekada kobtan ayaa uu ka bilaaban doonaa. Aabbihii waa uu farxay, waxa na uu rejaynayey farxaddaa caawa timid ee isaga iyo beesha ba u ah in la la soo dhawayn doono. Sidaa uu doonahayey xaalku ma noqday? ayaa aad is weyddiinaysaa.

Dood ayaa dhex martay raggii beesha. Dood weyn ayaa ay ahayd. Qodobka laga doodayey waxa uu ahaa: caawa in aan la guurin ee inanka wanqal loo sameeyo, iyo taa ka soo horjeedkeeda. Doodda xooggeedu waxa ay dhex martay Goodir iyo Negeeye aabbihii. Aad ayaa ay isu afdhaafeen. Xaaladdii cakirnayd ee horay u jirtay ka hor dhalashada gabankan, waxa soo raacay farxad iyo murugo dhowr daqiiqadood ba aysan u dhexaynin. Kolkii dumarkii mushxaradeen oo farxad awgeed 'ululululululu' dhaheen, waxa khilaaf xooggan soo kala dhex galay raggii waaweynaa, gaar ahaan Geeddi (Negeeye aabbihii) iyo Goodir oo ilaa yaraantiisii colaad gaamurtay Geeddi u qabay, xididkeedu na ku xidhmaysay talada reerka iyo masuugnimo. Geeddi oo ku dhex jira xoolihii oo doonahaya in uu soo xulo neefka ugu wanaagsan si inankiisa uu ugu wanqalo, ayaa Goodir oo is afdhaafkii ka xanaaqay cabbaar uu maqnaana ka dib waxa uu soo qaatay qori, dabadeed, gaaddada rasaas iftiimaysa, qaylinaysa, oo olol ba'an leh shaandho kaga dhigay Geeddi!!! Isla habeenkii uu dhashay Negeeye ayaa aabbihii iilka la dhigay! Farxaddii dhalashadiisa waxa xigay murugadii dhimashada ee aabbihii! Shilkaas weyn ee dhacay ayaa ah saldhigga ugu weyn ee ay ka duulayso, isla markaanna curiyayaasha suugaaneed ka unkamayaan, ee sheekada Aanadii Negeeye.

Magac ujeeddo la'aan u ma baxo. Negeeye waxa loogu bixiyey reer diyaar u ahaa geeddi ayaa dhalashadiisii sabab u noqotay baajinteeda; sidaa ayaa kolkaa loogu magacaabay Negeeye. Negaanshahaa reerka ku yimid loo ma aayin. Waayo? Waxa ay keentay kala qaybsanaantii feker ee kolkii hore ka sakow, bilowga colaad muddada ay socon doonto saani loo qiimayn karin. Dhacdooyinka na dhacdadan ayaa ibo fur u ah.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Duni madow ayaa uu dhashay Negeeye. Wixii ugu horreeyay ee dhegihiisu maqlaan waxa ay ahaayeen dhawaaqii rasaasta. Neefkii loo diyaarinayey walqashiisa waxa cunto looga sameeyey raggii aabbihii soo aasay! Jawi khayr aan lahayn, cabsi badan jirto, oo jiilaal darani dadku la ildaran yihiin ayaa uu dhashay. Muuqaalkaa aan qurxoonayn waxa ugu darsamay, arrin hab dhaqankiisa iyo hab fekerkiisa qofnimo saamayn weyn ku yeelan doonta: waa dilkii aabbihii. Sidaa awgeed, Negeeye waxa uu ku soo aaday duni madow ah. Sidaa awgeed, garashadaadu waxa si dhow sir ahaan kuugu sheegaysaa, noloshiisa na tabtaa in ay u madoobaan doonto. Ma u madoobaan doontaa? ayaa aad is weyddiinaysaa.

Sheekadu ma ahan mid akhris keliya ku eg, waa mid akhris iyo ku fekerid loo farshaxanneeyay. Haddii uu Negeeye dhalan lahayn, dilkaa dhacay ma dhici lahayn, sow ma aha? Go'aanka lagu baajiyey geeddiga reerka, meesha ba ma imaan lahayn, sow ma aha? Farxadda dhalashada iyo murugada dhimashada ee isku lammaanoobay suuragal ma noqon lahayn, sow ma aha? Mise waa arrimo qarsoon, qayb ah, oo qaddar loo yaqaan? Maankaagu in badan waxa uu kugu cadaadinayaa qalinka aad nuxurka sheekada ku qoranayso inta aad buugga dhex geliso, kor iyo hoos in aad is kula hadasho, oo wax iska weyddiiso waxan aad akhriyayso. Si aad wax ka ogaato arrimahan, iyo si aad ugu sii dhawaato biya dhaca dabuubeed ee sheekada, hiyikac aan xad lahayn ayaa kugu dhacaya. Waa curis sheekada lagu iidaaneeyey. Waa na halka akhristaha iyo sheekadu isaga xidhmayaan, ee xiisaha kor u qaadaysa.

Is afgaranwaagu waa dhaqan nolosha aadamaha ku jira. Inta badan dagaal ma dhaliyo, haddii se laga maarmi waayo na dagaal dhimasho keena ma dhaliyo. Sidaa awgeed, Goodir haddii ay murmeen Geeddi, oo isagu qabay feker ah wiilkan yar yaa aan loo baajinin geeddiga beesha; maxaa sababay in uu gacan adeegsado oo naf nool dhimasho ku hubsado? Kala tagsanaanta iyo rumayn la'aanta wixii Goodir laga filayey ee ahayd in uu qanco ama fekerkiisa si kale ugu guulaysto iyo adeegsigiisii rasaasta nool; waa ta sababtay cidhiidhi nololeed oo ballaadhan in uu is geliyo iyo in cunuga dhashay nolosha ka xumeeyo. Curiyuhu waxa uu adeegsaday dibirrooti ilaa afar nooc ah, oo tani ay ka mid tahay.

Nolosha Negeeye xaaladahaa is huwanta ah ayaa aas'aas u noqon doona. Waxa uu ku soo koray nolal adag. Dhimashadii ka dib, hooyadii waa ay guursatay oo waa ay ka soo kabatay murugadii maaneed. Awel isaga oo la ogaa sidii uu dunida ku yimid, waxa ugu darsamay naxariis adeernimo oo booskii aabbihii u gasha oo uu san ka helin adeerkii hooyadii guursaday! Taasi na waa wajigabax hor leh iyo kadeed ku khasbi doona macangeg iyo manaxe aan waaban in uu noqdo. Labaddaraadle, waxa uu ku barbaarayaa nolol aan qurux iyo qiime lahayn ama ay ku yar yihiin. Hooyadii si ay u kala badbaadiso iyada oo xaal og curadkeeda iyo saygeeda cusub, waxa ay is kaga xawishay hooyadeed (ayeydii) Dahabo, si ay u koriso oo qur'aanka na u barto.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Ina Warfaa (hooyadii) maxaa ugu wacan sababta wiilkeeda, iyada oo goobjoog iyo xog'ogaal u ahayd arrintiisa in ay ambiso, oo mas'uuliyaddiisa barbaarineed iyo garasho toosintiisa isu dhaafisay? Waa weyddiin si degdeg ah aad isku weyddiinayso. Miyaa aan la odhan karin, labaggalley waa xeelad siyaasadeed ay ku kala badbaadin kartay inankeeda iyo ninkeeda, xattaa haddii ay ka baqaysay madaxa in ay isla galaan oo isku khatalmaan? Ninkeeda ayaa kala culuslaaday wiilkeeda, miyaa aan la odhan karin? … ? Weyddiimahaas ayaa maankaaga harqinaya, kugu na khasbaya feker in aad u dhaqaaqdo. Taasi na waxa daliil ay u tahay heerka farshaxannimo ee qoraaga, oo akhristaha ka dhigahaynin arday cusub oo wax ku shubis u baahan, bal se, sidii qof jaamici ah u la dhaqmaya, oo looga baahan yahay duuduub wax wal in uu ku dhaafin ee, feker la yimaaddo. Xiisaha sheekadu waa mid aan laga faaloon karin inna ba.

Damalweyn waxa la yagleelay qarnigii labaatanaad bilowgiisii. Nin u dhashay deegaanka oo ka soo xamaashay ama ka soo xoogaystay Cadan ayaa dhismaheeda bilaabay. Ninkaasi doon ayaa uu ku soo safray, dabadeed, Damalweyn yimid. Markii uu tiirkii ugu horreeyay taagay oo ganacsigii ugu horreeyey ka furay, waxa si is dabajoog ah u imanayey dad kale oo iyagu na siyaado fikir la imanayey. Maskaxyadaa la isu geeyey ayaa ay meel cammiran oo caan ah ku noqotay. Sababta magaca loogu bixiyay na waa damasha waaweyn ee ku yiillay. Horay, waxa ay ahayd tuulo hodan ku ah daaqa xoolaha. Markii dambe na waxa ay noqotay magaalo weyn oo ganacsi leh, biyo la'aantii looga carari jiray na waxa laga ga badbaaday baraako dhowra oo laga dhisay. Hadda ba, waxa weyddiin ah, Damalweyn xaggee ayaa ay ku taallaa? Ma Koonfur ayaa ay ku taallaa? Muqdisho masaafo imisa ah ayaa ay u jirtaa? Haddii aysan ku oollin dhulka, xaggee ku taallaa? Ma cirka, mise badda? Ma buuraha, mise dhulka hoostiisa? Damalweyn waa xaggee? Intaa ba ma aha miyaa, oo Soomaali dhaqankeed iyo fikirkeed ayaa laga matalay? Mise iyadaa ba Soomaali ah? Dadkeedan isku wada midka ah ee dhegaha waaweyn, ee dhaqan xumada shahaaddo sare ka qaatay, tolow, yaa ay yihiin? Mar kale, Damalweyn ma noloshii miyiga ayaa laga metalay? Labada qabiil ee wada degi jiray yaa ay ahaayeen? Negeeye qolodee ahaa? Curiyuhu hal mar ma qeexin sirta Damalweyn. Taasi na waa marag xoog leh oo caddaynaysa sheekadu mala'awaal in ay tahay, ee aysan dhab ahayn; iyo heerka farshaxannimadiisu gaadhay.

Xiddiga kowaad ee sheekada, Negeeye, waxa ay saaxiibbeen Diiriye. Diiriye laftirkiisu waa xiddiga labaad ee sheekada. Dhibaatooyinkii badnaa ee Negeeye lahaa iyo dhaqan xumadii uu ku kici jiray ayaa sababtay naanaysta "habaarqabe" in loo bixiyo. Muxuu habaarqabe u noqon waayey, nolol habaaran ayaa uu ku dhex dhashay kuna soo dhex koray. Waa marka aad u garaabayso. Marka kale, dhan kale ayaa aad ka eegi oo sidaa ka duwan. Ayeydii loo soo diray si ay u koriso, waxa ay isku dhaceen kolkii uu macallinkiisii Aw Faarax loox madaxa kala dhacay. Ayeydii oo qudha isku ma dhicin ee xattaa bulshadii magaalada ayaa ay is naceen oo u aragtay shaydaan. Halkaa ayaa uu ka bilaabahayaa nolosha iskorisnimada ka dib ayeydii markii ay isku dhaceen.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Muddo badan ayaa uu Damalweyn joogay. Kol ba duruuf nololeed iyo waayo u gaar ah ayaa uu la noolaa. Hooyadii Dhool ayaa ugu timid, xidhiidhin la'aan labadooda u dhexaysay awgeed oo iyadu sababta lahayd, Damalweyn. Xaalad ogaansho iyo yool baarid sarbeeban ka dib, waxa ay kula talisay in uu san aarsan oo falkaa aad isaga jiro. Labo sababood ayaa ay u sheegtay oo codsigalkeedaa maangal u ah. Marka kowaad, waa in la is dhaarsaday oo godobtii dhacday xeer dhaqammeed lagu xaliyey, oo mag la kala qaatay. Iyo marka labaad, in uu yahay madi, oo haddii uu wax dilo isna la dili doono. Hooyadii jawaab cad kama aysan helin. Waxa taa u weheliyey in ay la yaabtay sida uu u ekaaday, sida uu goonibax u noqday, sida aad mooddo gebigiisa ba waraabe aarsi tag ah in uu yahay … Kol ay weyddiisay waxa uu jecel yahay in ay u fuliso na, waxa uu hordhigay xabaashii aabbihii in ay tusto! Taasi na waa dhacdada kowaad ee isaga oo nool, garasho iyo fikir leh si xeeldheer dib u xusuusisay dhacdadii isagoo wax ba kala ogayn dhacday. Halkaanna waxa uu ka bilaabahayaa halganka uu u gelayo in uu aarsado.

Marar badan oo ay Goodir is arkeen, isaga oo ka indha buuxsanaya, isaga oo shiishbarad ah oo carruuro cayaartaa la cayaaraya uu isku dayey toogasho carruureed in uu ku dilo, iyo mar kale oo uu hoygiisii soo gubay ba; ugu dambayn, Goodir oo ka soo carraabay Damalweyn ayaa uu jidka u sii galay, cabsigelin iyo u beenguurid, iyo baqasho iyo naxdin dheeraada oo Goodir muddo ku jirtay, la is arag. Goodir damac in uu is difaaco oo aan xabbadda laga ga horrayn laakiin, wax wal ba waa sida ay yihiin e', xabbaddii Negeeye ayaa hor dhacday oo gaaddada ka daloolisay, dhabar dhabar na u riday. Goodir dhimay! Negeeya na aarsay! Tolow, isna ma la dili doonaa, ileen aano waa mashruuc ma dhammaato ah e'? ayaa aad is weyddiinaysaa. Halgankii uu soo waday muddo haddii uu ku guulaystay, sheekadu halkaa ma ku dhammaanaysaa ayaa aad is weyddiinaysaa? Halkaa waxa aad ka fahmaysaa silsiladda ay sheekadu ku socoto in ay tahay, doontii sabaynaysay. Waxa aan u la jeedaa, kol wal ba oo aad is tidhaahdo sheekadu waa ay isa soo xidhaysaa oo gunaanadkeedii ayaa la joogaa, ayaa dhab aad u arkaysaa iyada oo quusitaankii ka soo baxday oo karaar qaadatay, oo is furfuraysa. Dhacdo ba dhacdo kale ayaa ay kuu dhiibaysaa. Xiisaha sheekadu markan waxa uu gaadhayaa figta ugu sarraysa.

Negeeye waxa uu imanayaa Xamar. Waxa na uu ku soo degay guriga abtigii, Rooble. Caasimadda waxa ay iska helayaan saaxiibkiisii Damalweyn iyo dibjirnimada, Diiriye. Waxa na uu ka xog qaadanayaa sida magaalada xaalkeedu yahay iyo sida ugu wanaagsan ee loogu noolaan karo, si sarbeeban. Muddo ka dib, waxa uu goosanayaa hammi ka dib ciidammada millatariga in uu ku biiro, oo uu noqdo askari millatari ah oo haybad leh. Maadaama noloshii Damalweyn adkayd, cidhiidhi ahayd, oo runtii qof geesi ah mooyaanee qof kale ka bixi karayn; waxa ay ka caawisay tababbarka in uu ku soo baxo, oo sarkaal loo bogo noqdo. Alifkii ugu horreeyey ayaa uu ku guulaystay ka dib, tababbarkaas. Noloshiisa askarinnimo halkaas ayaa ay ka bilaabanaysaa.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Tababbarkii kowaad kolkii uu soo dhammaystay, ee uu alifkii ugu horreeyay ku soo qaatay, waxa muddo dheer ka dib uu ku biirayaa ciidankii ka qayb qaatay xasuuqii Buntilaan ka dhacay ee dawladdii millatariga ahayd samaysay. Wixii hore ee isugu jiray dhaqan xumo iyo akhlaaq xumo waxa ay u ahaayeen gundhig iyo bar bilow uu hadhow si aan gabbasho lahayn u naaxnaaxin doono, kolka cudud shaqaynaysa oo taabbagal ah iyo ragannimadiisii uu aaminsanaa isla helo. Wax allaale iyo wixii dhac, boob, bililiqo, kufsi, musuqmaasuq, balaayo iyo baas ahaa ee Mudug ka dhacay, waxa uu ahaa xubin firfircoon. Inahaas sidii xoogga lahayd ee uu u dhaqan geliyey iyo sidii uu u ahaa askari calooshii-u-shaqayste ah oo amarka la siiyo aqbal mooyaanee diiday aqoonin, ayaa uu ku hantiyey oo la guddoon siiyay xiddigtii labaad!!! Xiddigta labaad ee darajada ciidammada, Negeeye, wax aan xasuuq iyo fool xumo bani'aadannimo ahayn kuma helin! Manaxaan, masoojeeste iyo maan-gaab waalli u raacday ayaa uu noqday. Bahal naftiisa in laga ilaaiiyo mudnaan gaar ah lee dahay ayaa uu noqday. Luggooyo la qofeeyey ayaa uu noqday!!! Tu kale oo dhacdadaa ka daran ayaa jirta.

Sarkaal Negeeye waxa uu yimid Hargeysa, si xiisadda jirta uu u walaaqo, oo dhibaatada gobollada waqooyi ka jirta heerka ugu sarraysa gaadhsiiyo, oo dab iyo baasiin walaalo kala lumay in ay yihiin u sheego. Maadaama isaga dan ay ugu jirto in uu magac iyo maamuus helo, dantiisa danooyinka oo dhan xattaa ta dalka iyo weli ba saaxiibbadii ka hormariyo, oo isagu noqdo jikatoor ka adeegan kara dab wal ba oo dhamacdiisu aad u diirran tahay, ka fekerkii uu ka fekeray mucaaradka in uu ku biiro natiijo dheefeed uga ma soo bixin. Siyaasadda na in uu ka yara nasto waa u geeri iyo gaajo. Sidaa owgeed, sida dantiisa ay ku jirto ee uu arkahayey waa in uu sameeyo wax allaale iyo wixii kelitaliye Afrikaan ah oo awood siyaasadeed, dhaqaalle iyo bulsho yaac iyo yur ku dhahda waayey isku helay wixii uu samayn jiray. Wixii uu samayn jiray!

Gaas fadhigiisu yahay Burco ayaa uu ku biiray. Burco oo ay ka muuqatay sawir argagax leh oo fool xumo deegaan iyo dad, iyo burbur iyo barakac tilmaamaya ayaa loo geeyey fool xumadaa in uu sii fool xumeeyo oo heerka ugu shisheeya gaadhsiiyo. Tumashadii, dhacii, dilkii, boobkii, burburintii, xasuuqii, dabargoyntii, barakicintii … waa uu labo jibbaaray. Tii Mudug ku barbarasho badan iyo waaya'aragnimo uu ka helay ka dib, tan ayaa uu si fiican u shaqeeyey aragtidiisa, oo muruq, maal iyo maskax isu geeyey sidii uu nolosha u fasahaadin lahaa oo uu ugu falaadi lahaa sida fekerkiisu u soo bandhigo. Tuulooyin ayaa uu gubay. Dad nool nool ayaa uu baska aakhriro saaray. Qaar ayaa uu siliskii ka dhacay oo qoortooda ka dhuftay. Hantida guryaha taalla iyo goobaha kale midh kama reebin. Gabdhuhu waa u wada xalaal oo qof keliya oo isaga xaaraan ka ahi ma jirin! Mujrim Ilaahay ka xadhig furtay ayaa uu noqday.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Ruux sidaa u dhaqmaya mas'uul ma noqon karaa? Iska daa in uu noqdo e', tiisa ayaa uu xattaa ka noqon karin. Negeeye waxa uu guursaday labo hablood, Amran oo ilaa yaraannimadii soo wada koreen hawlo badan oo wanaag iyo xume isugu jira na soo wada sameeyeen, iyo leyla oo abtigii Rooble dhalay. Ta hore saddex carruurood iyada oo leh in uu furo waxa ka daran, sidii uu u ahaa aabbe xun oo carruurtiisa soo booqan, ka warhaynin, tarbiyaynin, oo xaalkooda si dhow iyo fog ba u la soconin! Aabbe xun? Muxuu soo booqdaa, ka warhayaa, tarbiyeeyaa, oo xaalkooda la socdaa tiisii ayaa uu la yaabban yahay, oo gebigiisu ba gudaafad soconaysa weeye! Ta kale abtigii in uu dhalay oo ay ilmaabti yihiin ka sakow, aroos wanaagsan in uu u dhigay ka dambow, waxa uu u la dhaqmay si xun. Xamar ayaa uu kaga tegay isna Burco ayaa uu dilaa weyn oo caan ah ka noqday. Xaq iyo waajib isaga ay ku lahayd mid na kama aysan helin. Waxa uu marasho iyo masruuf uga ga dhigay dhiiggii uu ka ganacsan jiray ee uu dilaalka ka ahaa. Hadyaddii uu uga dhigay siliskii uu Hodan ka soo xaday goortii ay ogaatay, waxa uu raalligelin uga dhigay Burco oo aysan kala aqoonin sidii nin in uu u garaaco oo iyada oo la moodo qalliin culus in ay gashay Xamar ku soo laabato. Sidii xumayd ee uu u furay na waa sida ugu xun ee dad is xigaa ku kala tagaan!

Filimkii waxa uu soo gaadhay oo haatan marayaa aakhira -saacii. Negeeye wax allaale iyo wixii hanti uu lahaa waa uu xaraashay, weli ba qiimo aad u hooseeya ayaa uu ku xaraashay. Lacagtii xaraashka iyo tu hore oo uu haystay oo kolka la isu geeyay lacag fiican u noqotay, Xamar oo sii holcaysa oo dawladdii Soomaaliyeed cago adag ku sii taagneen ama burburtay, ayaa uu go'aan ku gaadhay dhoofleyda in uu ka mid noqdo oo dhanka berriga maro. Bahalnimadiisii iyo damaacinnimadiisii xattaa isaga oo afartan jir ah ayaa weli wax dhicid maankiisa ka bixin, oo ay ka guuxaysay! Gaadhi Laanguruusar ah ayaa uu ku sii xisaabtamay in uu la sii baxsado!!!

Waddada dheer ee koonfurgalbeed Xamar uga baxda ayaa uu gaadhiga ku jiheeyey oo safarkiisii dhimashada halkaa ka bilaabay. Waxa uu mar ba waddo qaaddo ba oo ka leexda ba ama ay ku soo awdanto oo tu kale uga baydha ba; waxa mar ba ay is baacsadaan koox isaga la mid ah oo qawlaysato ah oo iyaga na gaadhiga uu soo dhacay in ay ka sii dhacaan doonaya; ugu dambayntii, isaga iyo shuftadii waa ay is heleen, xabbad ayaa ayna bawdada kaga dhufteen! Aad baa uu u rafaaday. Oon iyo gaajo ayaa wehel u noqday. Dad iyo duunyo ayaa uu arki waayey. Waa uu dhiig baxay. Socodkii waa uu sii wadi kari waayey. Goob ay ah oo dhir waaweyn ku taallo, bal se saxare aan wax ba ka duwanayn ayaa sidii neef qalan u kala daadsan yahay. Tolow maxaa uu sameeyaa? Ma kici karo oo ma socon karo! Tolow maxaa uu sameeyaa? Dad nool oo u dhow oo gurmad iyo gargaar u fidin kara ma jiraan! Ma ugaadha ayaa uu sugaa inta isaga oo nool oo ujeeda ay hilibkiisa xarrago cuni lahaayeen?


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Maya! Baastooladdiisii ayaa uu gacan mayd ah ku soo qaaday, laakiin, istiil ragannimo weli kama madhna. Dhafoorka ayaa uu ku muday, dabadeed, murdisada na keebka ku xoojiyey oo xoog u tuujiyey, maxaa dhacay? Xabbad ayaa dhacday. Yaa dhintay? Filimkii dunida madow ku bilowday iminka na maxaa uu ku dhammaaday? Markii ugu dambeeyay haddii ay indhahaagu qabteen Negeeye oo meel cidla ah oo nafar bani'aadam ah joogin isaga oo sidii furaash aan habaysnayn u goglan, aad u dhiig baxay, xabbado cirka u riday bal si wax bani'aadam ah oo meeshan ka ag dhow gurmad ugu fidiyaan, iyo shimbiro xabbadihii darandoorriga u dhacayey ka cararay; markii uu baastooladdii dhafoorka iska saaray, ee afkeeda dhawaaq ka baxay, ayaa kugu dambaysey filimkii aad ka daawanaysay maanka gudihiisa. Sawirkii aad arkaysay waxa beddelay sawir madow! In yar ka dib haddii aad is tidhi bal sug waa intaas oo sawirku ka dhaqaaqaa meesha e', sidaa ayaa uu ku dhammaaday filimkii. Sidaa ayaa sheekadii Aanadii Negeeye u soo gebagebowday. Sidaa ayaa ay dunidii ay ka xaalad iyo xog bixinaysay murugadii ay ku bilowday mid aan ka dhicin ku soo gunaanaday!!!

Xusuus qoto dheer oo maanka aan ka baxaynin ayaa ay kaaga tegaysaa. Kolka aad dhiganaha ku celiso kobtii aad ka soo qaadday, maalmo badan oo badan ayaa cajaladdii filimka aad daawatay qof xusuusteeda ku casuuman noqonaysaa. Cutubyo dhan oo xusuuseed ayaa kol ba mid maankaaga ku soo dhacaya. Nolosha Soomaalida: hab fikirkooda, qaab nololeedkooda iyo xeerarka dhaqammeed; magaalagalkii iyo sidii miyiga looga guuray, fasahaadkii reer magaalku la yimidday iyo is barbardhiggii labada nololood; dhibaatada qabyaaladda iyo aarsiga; gumaysigii Afrika, dagaalkii 1977 iyo qiimayntiisii, khalkhalkii falsafadda, ujeeddada iyo fekerka waxbarashada; xayraannimada iyo dibjirnimada; aragtiyo dhaqaalle iyo siyaasadeed; tayadii xumayd ee siyaasadda taliska iyo hab xukunkii gurracanaa; maangaabnidii jabhadaha; kor u qaadidda dhaqanka akhriska iyo qoraalka; qiimaha suugaanta ee nolosha aadamaha; iyo cutubyo kale ayaa kol ba mid soo xusuusanaysaa, ka fekeraysaa, oo qiimaynaysaa sida uu curiyuhu uga hadlay. Layaabbadaydii kolkii aan arkay ridii madaxa la gashay daasadda, ayaa aad ugu tegaysaa dhaqammada baxaalliyaasha iyaga oo nolol aysan.

Dhaqan xumada Negeeye maxaa ugu wacnaa? Ma in yaraantiisii wanaag uu san arkin baa? Ma noloshii qallafsanayd ee qaab darrada ahayd ee uu ku soo koray baa? Ma qofnimadiisa ayaa ba u abuurnayd sharwade iyo shaydaan in uu noqdo? Ma looxii macallinkiisa dhakada kaga garaacay baa? Mise waa ushii Aw Faarax? Ma ayeydii uu kaga qaylisiiyey baa? Ma xaaraantii uu ku xarragooday baa? Ma dhillaynnimadii uu yaraannimada ku soo tarbiyoobay baa? Ma dadkii uu ka ganacsan jiray ee sida xoogga ah u askarayn jiray baa? Ma hablihii uu maalka adduun ku sasaban jiray sida uu jecel yahay na ka yeeli jiray baa? Ma dadkii uu dhiiggooda ku qubaystay baa? Ma Amrantii jimanku derdereen ee duufsadeen ayaa damiirka ka xayuubisay? Ma aanadiisii iyo dhaartii uu ka been sheegay baa? Ma dardaarankii hooyadii oo uu ku ballanfuray baa? Ma carruutiisii uu korsan waayey baa? Ma riwaayaddii uu Raxmo-yaray u jilay baa?...?


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

# Dheefaha:

Sheekadani waxa ay ku baraysaa, ku fahamsiinaysaa, oo si kala dhigdhigan kaa dhaadhacsiinaysa sida loo qoro qorista toolmoon ee sheeko faneedda. Xattaa haddii aadan weligaa qorin ama aadan akhris wanaagsan u lahayn, iyada ayaa inahaas kaaga filan. Keliya waxa aad u baahan tahay ayaa ah, ku celcelin, ku fekerid, iyo dhuuxid aad u heer sarraysa. Haddii aad tahay qoraa sheeko faneedda qora na, waa marjac weyn oo aad ugu laaban doonto aqoon iyo waaya'aragnimo badan oo la xidhiidha fanniga sheeko faneedda.

Sheekadani waxa ay xog ballaadhan ka bixinaysaa sooyaal aad looga hadlay, sidoo kale, aad loo farafareeyey. Kaw iyo labaatankii sanno ee kacaankii barako-waa hoggaaminayey talada siyaasadeed, wajiga dhaliisha waxa laga sameeyey daraasado dhowra, sidoo kale, waxa laga qoray dhiganayaal iyo maqaallo. Inta ba, akhris markii aan ku sameeyay waxa aan ogaaday farafarayn in lagu sameeyey. Bal se, sheekadani aad ayaa ay kuwaasi uga ga duwan tahay, labo sababood ba. Sababta kowaad, waa iyada oo sheeko faneed ah oo arrimaha qaar si aqoonaysan ama sooyaaliyaysan aan u gelin uga na faaloonaynin. Iyo sababta labaad, qoraaga oo ku dedaalay itaal meel uu dhiga ba dhexdhexaad in uu ka noqdo tebinta iyo faaqidaada sooyaalkaas. Waxa aan, hubaashii, si kalsooni ku jirto aan u lee yahay, qoraagu isaga oo raba reer tolkii in uu fahamsiiyo mushkiladaha ay la nool yihiin, isla markaanna u kala garqaado dawladdii iyo shacabkii ay maammulaysay, oo si dhab ah looga jawaabo sababihii burburka iyo cidda loo aanayn karo dumintii dawladdii weynayd; hadda na, jawaabta waxa uu u daayey akhristaha. Ibraahin aad ayaa uu ugu dedaalay sooyaalka farafarayn in uu ka ilaaliyo. Si taa la mid ah ayaa uu ugu dedaalay weyddiimaha culculus jawaabo feker ah oo qeexan in uu san ka bixinin.

Dillaacii ku yimid hab dhaqanka nolol iyo fikir ee Soomaalida ayaa ay daahfur ku samaynaysaa sheekadu. Kala saaris la'aanta aqoonayd, ujeeddeed iyo manhajeed ee hidde iyo dhaqan; qabiil iyo qabyaalad; qabiil iyo qaran; miyi iyo magaalo; iyo diin iyo dhaqan ee natiijada falcelineed ee ka timaaddaa ama horumar ilbaxnimo ama dibudhac ilbaxnimo midkood noqonayso, ayaa ay sheekadu si tifaftiran u qeexaysaa. Dillaacaasi saamaynta taban ee uu u gaystay kacaankii Oktoobar iyo bulshadii ku hoos noolayd xukunkaas kelitaliska ah, ayaa ay si gaar ahaaneed ugu nuuxnuuxsanaysaa.

Aanadii Negeeye, waa kaamarad weyn oo wax wal ba sida ay u weyn tahay u weynaysiinaysa. Waxa ay sawir farshaxannaysan ku cabbiraysaa isbeddelka weyn ee ku yimid aragtida qofka Soomaaliga ah ka hor xilligii dawladnimada iyo ka dib markii la dawladoobay. Waxa ay is weyddiinaysaa sababta ugu weyn ee isbeddelka sidaa u foosha xun sababay?


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Sheekadani waxa ay ku baraysaa sida afkeenna hooyo loogu adeegsan karo mala'waal, sida farriimo aqooneed, murtiyeed iyo madadaalo ereyada loo dhex gelin karo, iyaga oo isugu jira hab daalac ah iyo hab dadban ba, sida noocyada curiyayaasha suugaanta iyaga oo ku kala imanaya wajiyo iyo habab kala geddisan loo kala meelayn karo, iyo sida wanaagsan ee afkeenna loogu aftahammoon karo.

Sheekadani waxa ay siddaa farriin culus, taas oo ay cod dheer ku sheegayso. Farriintaasi waxa ay daaran tahay digniin culus. Waxa ay ka digaysaa dhibaatooyinkii sooyaalkii ay ka warramaysay in ay soo laaban karaan mar kale, maadaama taariikhdu tahay giraan nololeed oo had ba bartii ay ka dhaqaaqday ku soo noqnoqota. Waxa bulshada Soomaaliyeed u gudbinaysaa dareen cabsi xoog leh ka muuqato, kaas oo sheegaya: haddii ay soo laabtaan xaalku sidii hore in uu ka darayo. Sidaa owgeed, waa sheeko-sooyaaleed digniin xambaarsan, oo ay tahay digniintaas in la ogsoonaado.

Sheekadani waxa ay akhristaha baraysaa ereyo uu san aqoonin ama muddo uu san maqlin ama xusuustiisa ba ka baxday. Sidoo kale, waxa uu baran doonaa wax badan oo ku saabsan hidde-dhaqammeedka bulshada Soomaaliyeed. Waxa intaa u dheer aqoon guud oo ku saabsan loollanka dunida ka jira ee aragtiyada dhaqaallaha iyo siyaasadda ku midabbaysan, iyo aydiyoloojiyadaha kala jaadjaadka ah; intu ba waa daruus uu ka heli doono inta uu dhex mushaaxayo bogagga sheekada.

Hadal iyo biya dhicii, kolka loo laabto aqoonta fanniga sheeko faneedda, oo sheekadan "Aanadii Negeeye" la saaro halbeegga sheekooyinka lagu miisaamo: sida ay ku bilaabantay iyo sida ay ku dhammaatay, sida dhacdooyinku u xidhiidhsan yihiin, sida jilayaashu u habaysan yihiin, sida daadiyuhu sheekada u soo tabinayo, isjiidadka sheekada, jihada sheekada, eray doorashada, mugga mala'awaalka, adeegsiga badan ee curiyayaasha, tuuryaynta hummaagga, tilmaamidda buuxa, gaadhitaanka guusha qarsoon, sarraynta diirradda, kala ilaalinta iskudhacyada, hab gudbinta dareemmada iyo xogaha, iyo dulucda sheekadu ba; waa sheeko quruxsan oo qaabaysan.

## Dhaliilaha:

Maadaama sheekadu ay ka warramaysay sooyaal dhan oo wanaag iyo xume labada ba lahaa, sheekada "Aanadii Negeeye" waxa ay ku saabsan tahay uun dhanka dhaliisha ama xumaha, dulmar mooyaanee si wanaagsan uga ma faalloon dhanka kale ee sooyaalka. Sidaa awgeed, waxa lagu tilmaami karaa dhigane dhaliil-faaqid ah.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Miisaanka sharciga (diinta iyo dhaqanka suubban) kolka sheekada la saaro, waxa soo baxaysa arrin layaab iyo argagax wadata. Waxa mar mar keligaa aad hoos hoos isku weyddiinaysaa, sheekada yaa loo qoray? Ma ummad Soomaali la yidhaahdo oo tiirarka nolosheeda habeeya diinta islaamka iyo dhaqanka suubban yihiin, mise ummad kale? Qoraaga hal-abuurkan curiyey isagu ma Soomaali muslim ah baa, mise waa ajnabi? Garanay bulshadu bulsho muslimiin ah oo Soomaali ah in ay yihiin, sidaa si la mid ah na garanay qoraagu qof bulshadaa si wal ugu abtirsada in uu yahay; hadda ba, maxaa khaldan? Aqoonta fiqhiga islaamiga marka la joogo, waxa jira wanaag aad u badan oo qof uu sameeyo ajar aad u badanna uu ka helo, bal se, hal shay oo dambi ah oo uu ku dhacay ayaa wanaaggaa badan ka miisaan cuslaanaya, ajarkii badnaa na kakac ayaa uu noqonayaa!!! Sheekadan waxa ku jira gefaf waaweyn oo labadaa tiirar duulaan cad ku ah. Wanaag wal oo ay lee dahay dhaliilaheeda ayaa waxbayahay ka dhigaya!

Sheekada waxa aad ugu tegaysaa fool xumooyin indhahaagu hubaashii ay la ilmaynayaan adiga oo aan is ogayn. Fool xumooyinkaas waxa ka mid ah fool xumada loo yaqaan "qaawinta cawrada aan bannaanayn!!!" oo sheekada aad iyo aad ugu soo noqnoqotay. Cutubka ugu horreeya ayaa aad ugu tegaysaa gabadh laga faaloonayo jidhkeeda guud ahaan, naasaheeda gaar ahaan (2007: 26). Kolka aad buugga wada dhammayso oo xisaabta dib isugu soo celiso na, waxa aad la yaabbaysaa inta hablood ee qoraagu uu qaawiyey ee hugii sharafta u ahaa ka bixiyey, isla markaanna iyaga oo mudh ah akhrisataha hordhigay. Waxa si gaar ah aad u la yaabbaysaa, hal gabadh oo keliya in uu hal mar wax ka badan qaawiyey! Taa adiga oo weli la anfariirsan ayaa aad hadda na si xaqiiq ah u hubsanaysaa xubinta uu xoogga saarayo ee mar wal ba kaamaradda sumaysani qabanayso, xubinta naaska in ay tahay!!! Kolkaa ayaa aad is weyddiinaysaa, xaaladda nafsiyadeed, dareemeed iyo garasheed ee qoraagu ku jiray kolkii waxan uu qorayey? Kolkii waxan uu qorayey? Kolkii waxan uu qorayey?!

Labada cutub ee ugu horreeya, ayaa aad kala kulmi doontaa wareer aad u badan sida sheekadu ay uga madhan tahay dhaqanka diintu ay na fartay ee ah in la asturo cawraadka muslimiinta iyo ceebahooda, ka bulsho ahaanna dhaqankeenna ku sugan. Bogagga (26, 33, 36, 37, 38, 41, 44 iyo 45) ee cutubka kowaad, iyo bogagga (63, 64, 83 iyo 87) ee cutubka labaad ayaa aad la yaabbaysaa xumaha ku jira! Bal ka warran tobanka cutub ee kale? Mooralkaaga ayaa hoos u dhacaya mar wal oo aad aragto mas'alo gef ku ah diinta, dhaqanka, dadnimada ama caqligaaga. Wax kale ba iska daa, xattaa caqligaaga!


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Fool xumada qaawinta cawrada aan bannaanayn, gaar ahaan ta dumarka wax ka daran ayaa aad hadda na ugu tegaysaa sheekada. Adiga oo maankaagu aad u la yaabbanaa sida xishood darrada iyo yaxyaxid la'aanta ah ee qoraagu ugu dhiirraday ka hadalka iyo sawiridda xubnaha xasaasiga ah ee dumarka, ee diin iyo curfi ahaan ba aysan bannaanayn qaawintooda iyo faalayntooda, ayaa hadda na aad arkaysaa 'xidhiidhka qarsoon' wax uu ugu yeedhay oo 'sinnada' ah isaga oo si faahfaahsan oo wajiyo badan leh uga hadlaya, isla sida mas'aladaa na sheekada ku soo celcelinaya! Dhacdada ku soo biirtay nolosha Damalweyn ee gogoldhaafka ah, qaabka uu uga hadlay iyo sida uu uga faalooday, waa si aad u foolxun oo damiirka nool iyo garashada suubban qaadan karin (B. 36-38). Sidoo kale ma aha dhacdadaas oo keliya, in ka badan siddeed dhacdo oo sinno ah ayaa uu aad uga faallooday, oo dhacdadii Leyla iyo wiilkii yaraa ka mid tahay (2007: 64) iyo dhacdadii Raage iyo Deeqa (B. 212-213).

Kolka aad si degan, hubsiimo leh, oo feejigan ereyga qoran u dhuuxdo oo xididkiisa afeed iyo halka uu macne ahaan ku aroorayo maskaxdaada u furfurto, waxa aad ogaanaysaa ujeeddo fog oo ka dambaysa dhaqammadan labada ah iyo kuwa kale ee daba socda. Sheekadu waxa ay akhristaha baraysaa gabdhaha in la la saaxiibbo, la la sheekaysto, la istiimiyo, haddii la doono guurka hortiis galmo la la sameeyo si loo ogaado tijaabada dhalmada; iyo sidoo kale sinnadu in ay tahay wax dhaqankeenna ku jira oo nolosheenna caadiga ah ka mid ah, xorriyadda qofka bani'aadamka uu haysto ka mid ah, oo aysan jirin xad qoran ah oo xakameeya. Labadaas dhaqammood si loo taabbageliyo oo manhajka nololeed ee Soomaalida lagu daro, iyada oo gabbasho laga dhiganayo awoodda "mala'awaalka", waxa sheekada lagu qurxiyey saddex arrimood oo mid wal ba sun tahay. Arrinta kowaad, ka dhaadhicin labadu ba nolosha caadiga ah in ay ka mid yihiin oo markii la reer magaaloobay la bartay oo la qabatimay. Arrinta labaad, xayaysiis aan caadi ahayn ayaa loo sameeyay si dadka loogu qurxiyo xorriyad muslimiinta ka maqan in ay tahay, oo ay habboon tahay helitaankeeda. Iyo arrinta saddexaad, qofku in ka helayo aqoon, kasbasho sarraysa iyo waaya'aragnimo anfac iyo raandhiis nololeed leh.

Qaawinta cawrada, saaxiibtinnimada ragga iyo dumarka ee xaaraanta ah iyo dhaqangelinta sinnada, dhaqan reer galbeed oo qoraagu soo waariday in ay yihiin oo ummadda Soomaaliyeed loo fatwoonayo in ay aqbasho si ay horumar ilbaxnimo iyo kasmo aqooneed u hesho - waa sida fikir ahaan ku jira sheekada - ka dambow, waa rukummada waaweyn ee akhlaaqiga ee falsafadda calmaaniyadda. Sheekadu na waa mid faafinaysa aragtidaas, oo si toos ah u duminaysa diinta iyo dhaqanka suubban. Awoodda lagu soo dhuuntay na waa awoodda "mala'awaalka". Taasi waa adeegsiga gurracan ee mala'awaalka.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Dhacdooyinka kale ee layaabka ah waxa ka mid ah, qoraagu isaga oo kuwa wanaagsan ka dabatagaya, isla jeerkaas na kuwa xun aan ka daba tegaynin!!! Raage markii uu soo booqday Shiikh Xasan oo casuumad u fidiyey, sida dhaqankeennu yahay diinteennu na na amrayso, hablihii guriga ku jiray waa ay carareen maadaama aysan hagoognayn. Cararkaas waxa uu curiyuhu tusaale ahaan ku tilmaamay "lo' waraabe duddada isu soo taagay (2007: 242)!" Hawd kolka uu xumaanta ka hadlayo, aad uga faaloonayo, qurxinayo, oo ku tiiqtiiqsanayo, sidaa si la mid ah ayaa, wanaagga uu u xumaynayaa, ka dabatagayaa, boodhaynayaa, oo foolxumaynayaa!!! Gabadh qaawan in ay jidhkeeda asturto oo nimanka gayaankeeda ah cawradeeda daawadsiin, goorma ayaa ay ceeb noqotay? Goorma ayaa ay se ilbaxnimo noqotay? Goorma ayaa wax lagu faano noqotay? Qaawanaanta iyo is gadiddu na goorma ayaa ay iyagu na wanaag ku dayasho buuxa leh noqdeen?! Gabdhihii is asturayey maxaa loo ceebeeyay? Oo kuwii is qaawinayey loo ceebayn waayey?! Waa layaab weyn! Layaab aad u weyn! Waxa uu qoraagu ku tuntay qaaciiddada waajibka ah ee diinta ba asalka u ah: wanaag farista iyo xumaan reebista. Sida uu ugu tuntay na waa in uu is weydaariyey!!!

Khaladaadka kale ee dhiganaha waxa ka mid ah fasirka aragtida wahaabiga. Wax la la yaabbo ma aha Ibraahin in uu u arko wahaabiyada iyo baraarrugii islaamka diin cusub oo Soomaaliya timid oo burburin xambaarsan. Sababta ugu weyn ee sidaa ku keliftay na waa aqoon iyo baadhis dhab ah oo uu san u lahayn aragtidaa iyo weli ba arrimaha aas'aaska u ah fahamkeeda, oo aqoonta caqiiddada iyo sooyaalkii dheeraa ee muslimiintu ka mid yihiin (B. 237 -250). Ibraahim waxa u wanaagsanayd, kolka ay arrimuhu yihiin kuwo adag oo aqoon, thaqaafo iyo akhris badan u baahan sida kuwan, in uu san ku degdegin ka hadalkooda ee uu u soo macluumo badsado. Mas'alo aadan u bisleen kolka aad gasho, mashaqo aan yarayn ayaa aad kala kulantaa. Waa xaqiiq.

Dhaqan xumooyinka buugga ku jira dhanka caqiiddada iyo fiqhiga marka laga tago, waxa ka mid ah khuraafaad iyo khusacbalaat! Amran sababaha faqriga keena in ay tilmaanto, iyo in ay dadka u oddorosto waxa qaddarku mustaqbalka u maleegayo, arrin khuraafo ah, sheeko suufiyo ah, oo axkaamta taa keliya ka dhismi kartaa gaadhi karto ciqaab ahaan godad adag weeye (2007: 97). Godkaas oo kale taxaddar in laga qabo oo aad la isaga ilaaliyo waa waajib. Weyddiintu waxa ay tahay arrimaha qarsoon ee qaddarku ka mid yahay Ilaahay mooyaanee yaa og? Maxaa Amran hawl Eebbe SWT lee yahay ogaysiiyey? Muxuu se yahay xukumka mas'aladaas?! Arrinta kale ee caqliga iyo dadnimada sugani diidayaan waxa ay tahay, loollanka bashariyada gaarka u ah maxaa malaa'igta soo dhex geliyey? Labada malag ee loollanka khayrku dhex maray ee is hirdiyey waa kuwee (2007: 101)?! Runtii, khuraafooyinka sheekada ka buuxa waa mid caqliyadda akhristayaasha ceebaynaysa. Waa mid aad mooddo hal-abuurku in uu u curiyey bulsho aqoon darran oo indho la' ama Indhawiriq la nool! Waa mid aad la amakaagayso sida ay uga madhan tahay diinta, dhaqanka suubban iyo caqliga fayow!


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

Hab qoraalka dhiganuhu waa mid wanaagsan. Aad u quruxsan. Oo dedaal badan ka muuqdo. Hadalka iyo qoraalku waa ay kala geddisan yihiin, mid wal ba hab gaar u ah ayaa uu lee yahay. Iyada oo sida wanaagsan ay tahay kolka wax la qorayo hab qoraal fidsan in wax lagu qoro, ayaa hadda na, kolka sheeko faneed la qorayo oo weli ba sheeko dheer ah, ay aad u sii muhiim tahay. Sidaa daraaddeed, labada hab ee fidsanaanta iyo koobnaanta waa labo hab oo sheekada loo adeegsaday. Taasi waxa ay keeni kartaa labo arrimood oo dareenkooda leh. Akhristuhu in uu ka xiise dhaco akhrinta sheekada, iyada oo sababtu tahay khalkhal faham iyo wareer manhajeed oo kaga imanaya labadan hab ee la wada adeegsaday; iyo hadafkii loo socday ee ahaa dhiirrigelinta dhaqanka akhriska iyo qoraalka iyo soo saarista bulsho aqoonaysan dhaawac in uu ku yimaaddo. Tusaale ahaan, "waa ay" iyo "way", habka hore ayaa ku wanaagsan sheekada, ah na habka fidsan. Laakin, labada hab waa uu wada qoray iyaga oo siyaalo kala duwan ku kala imanaya.

Waxa sidoo kale xusid mudan, in kasta oo weli dood aqooneed sax ah aan laga furin, jiritaanka ereyo aad u badan oo sida aynnu ugu hadalno iyo sida aynnu u qorno aad u kala duwan yihiin. Tusaale, haddii xarafka "o" isaga oo erey ku dhammaaday erey kala gadaal ka raaco, waxa uu isku beddelayaa abuur ahaan "a"; sidaa awgeed, innagu dhawaaq ahaan waxa aynnu adeegsannaa mar wal ba xarafkii asalka ahaa, ee ma ictibaarinno isbeddelka dhacay. Sheekadan waxa aan ka tiriyey in ka badan lixdan erey oo qoraagu uu san ictibaarin isbeddelkaas. Tusaale, Barokac, waxa ay sax ku tahay "Barakac"; bareyaasha, waxa ay sax ku tahay "barayaasha"; farogelin, waxa ay sax ku tahay "faragelin"; cagojiid, waxa ay sax ku tahay "Cagajiid"; iwm. Xarafkaa "o" waxa la mid ah xarfo kale, sida xarafka "e" oo tusaalayaasheenna inoogu jira. Sidoo kale, waxa jira arrimo farsamo oo aannu qoraaga ku kala duwan nahay, bal se, maadaama hawshu weli fikir tahay oo xaqiiqo loo hogaansamayo meesha oolin, waa waajib in aan la isku dhaliilin. Marka laga tago tix gaaban oo buraanbur ahayd, waa sheeko u baahnayd suugaan kale walow ba yaa ay badnaanin e'. Curiyuhu na waa hal-abuur suugaaneed, sidaa darteed, muhiim ayaa ay ahayd tixo kale in lagu daro.

Hadal iyo biya dhicii, kolka loo laabto aqoonta waxyiga iyo curfiga wanaagsan ee Soomaalida, oo sheekadan "Aanadii Negeeye" la saaro halbeegga ereyada lagu miisaamo diin ahaan iyo dhaqan ahaan: waa sheeko akhristaha baraysa gabdhaha in la la haasaawo, la dhunkado, la isku soo boodo, laabaha la is daymiyo, la is baasheeyo, xubnaha sidii la doono loo salaaxo, oo haddii ay suuragal tahay la isku galmoodo si dhab ahaan loo ogaado tijaabada qof wal in uu shaqayn karo. In sinnadu wax xalaal ah tahay, dhaqankeenna ku jira, oo xorriyadda qofka iyo doorashadiisa ka mid tahay. In cabbista khamriga, cayaaridda turubka, aadidda shaneemooyinka iyo daawashada aflaamta la soo bandhigo wax wanaagsan yihiin. Iyo ugu dambayn, waa sheeko ay ku jiraan khuraafaad iyo khusacbalaat, iyo farriimo daahsoon oo ay ugu dhib badan tahay mid odhanaysa, gabadh in reerkeed loo geed fadhiisto waa arrin laga gudbi karo.


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

# Gebagebo:

Dhuuxid iyo gorfayn daraasadeed ka dib, sheekada Aanadii Negeeye, kolka loo laabto aqoonta fanniga sheeko faneedda, waa sheeko quruxsan, habaysan, aad looga soo shaqeeyay, wakhti iyo dedaal fiican la geliyey, oo dhammaan xeerarkii sheeko faneeddu lahayd, gaar ahaan sheekada dheer buuxisay. Kolka miisaanka diinta iyo dhaqanka la saaro, waa sheeko qaawan, xume badan sidda, aad loogu dhex faafiyey oo la buunbuuniyey, oo ilaa xad labadaa tiirar si cad duulaan ugu ah. Kolka jaldiga iyo xaashida la qiimeeyo, ilaa iyo eegga ma aan arag anigu, jaldi sidaa u qaabaysan adayg iyo farshaxan ahaan ba, iyo xaashi sidaa u tayo sarraysa oo raandhiis fog leh. Kolka la qiimeeyo hab dhigaalka af Soomaaliga iyo tifaftiriddiisa ba, xaqiiqdii, waa hab qoraal iyo tifaftir wanaagsan. Kolka la qiimeeyo daabacaadda iyo farsamada na waa mid aad u cuddoon.

Waxa aan saddex talo oo wanaag ah u dirahayaa akhristayaasha, qoraaga iyo qorayaasha kale. Akhristayaasha, haddii aad doonayso sheekadan in aad akhrido, waa in aad ku akhridaa caqli soo jeeda, maskax shaqaynaysa iyo taxaddar hubsiimo leh. Qoraaga, waxa aan kugu hambalyaynayaa dedaalka weyn ee aad gelisay ummadda in aad wax u qorto guud ahaan iyo dhiganahan "Aanadii Negeeye" gaar ahaan. Waxa aan kaaga digayaa in aad noqoto aqoon yahan ka hadla wax uu san aqoonin; sheeko yahan ka bartay sheekada inta xun; qof doorkii kaga aaddanaa horumarinta garaadka iyo garashada bulshada iyo kobcinta aqoonta diin, dhaqan iyo dadnimo ee reer tolkii garanwaaya; wanaagga xume u beddela; xumaha na wanaag; iyo qof hibooyinkii uu Eebbe siiyey macne dooriya oo qallooc u adeegsada; Waxa aan ku han weyn ahay daabacaadda labaad gefafkaa waaweyn ee diinta in aad ka saari doonto. Qorayaasha, waxa aan idin kula dardaarmayaa in aad ilaalisaan tiirarka nolosha ee Soomaalida. Wax wal ba oo aad qoraysaan, marka hore ilaa iyo marka dambe ba waa in aad si run ah ugu bandhigtaan tiirarkaas, oo aad iska hubisaan in ay waafaqsan yihiin iyo in ay waafaqsanayn. Eray aad qortaan sabab yuu san u noqon naar geliddiinna. Taasi waa guul darro weyn.

Ugu dambayn, waxa aan dhiirri gelinayaa dhiganahan in la iibsado; sheekadan in la akhriyo, si wanaagsan loo akhriyo, isla markaanna akhris, fikir iyo ka doodid la isku daro; iyo in laga fogeeyo meel wal ba oo ay dhallinyaro aqoontooda diineed, dhaqan iyo thaqaafo hoosayso ka heli karaan, sida guryaha, dugsiyada hoose, dhexe, iyo sare iwm.

- Sawirka dhiganaha waxa aan ka soo xigtay ***Google.com***


Xaqqa Faafinta © 2015 Maskaxmaal.com

- "Inay dunidu wiigiyo bilyo tahay waxaan dhaamin
- Taariikhduna witiiti iska tahay walacsi kuu dhaafta
- Aynu nahay wadaal iyo qariib weerar dabajoogo
- Malag aan wax kale qabaninoo waaga tirinaaya
- Waardiyaha ilaashada naftana waaran baa u go'ane
- Waddaa ina sugaysiyo jidkii uu waalidkeen maraye"
  - Gabay/Wacdi = Gabyaa Jaamac Kediye Cilmi IHL

---


- **W/Q: Mufakkir Maxamed Cabdirisaaq Saciid "Samiik"**
- **Mohamedsamiik@gmail.com**
- **Guddoomiyaha Naadiga Qalin Maal**
- **Aqoon baadhe madaxbannaan**
- **Wajahaddayda Faysbuugga:**
- **https://www.facebook.com/Samiik10**
- **Boggayga Faysbuugga:**
- **https://www.facebook.com/pages/Mufakkir-Mohamed-Samiik/543082142505150?ref=bookmarks**
- **Degelkayga ii gaarka ah :**
- **http://samiik.wordpress.com/**